Noocyo iyo afaf kale
Waxa aad ku heli kartaa waraaqahan luuqado kale, far waawayn, farta indhoolka ama qaab kale si bilaash ah. Kala xiriir Explore Health halkan explorehealth@oha.oregon.gov mise 855-268-3767 (wicitaan cod ah). Waxaan aqbalaynaa dhammaan wicitaanada adeegga relay (gudbinta isgaarsiinta).

Xaquuqahaaga iyo Waajibaadkaaga

Macluumaadka qaybtaan wuxuu qeexayaa waxa ay Madasha/Suuqa Caymiska Caafimaadka ee Oregon (Oregon Health Insurance Marketplace), oo ka tirsan Hay'adda Caafimaadka Oregon (Oregon Health Authority, OHA), ay ballanqaadayso inay kuu qabato. Kuwaas waxaa loo yaqaan "xuquuqahaaga."

Waxa kale oo ay qeexaysaa waxa aad adigu ballanqaadayso inaad samayso marka aad codsanayso ama aad helayso kaalmada caafimaadka. Kuwaas waxaa loo yaqaan "waajibaadkaaga."

Fadlan si taxaddar leh u akhri foomkan. Waxaad weydiisan kartaa Shuraakada Diwaangelinta ee Explore Health ama Wakiilka Adeegga Macaamiisha inuu kuu sharxo foomkan. Haddii ay jiraan wax aadan fahmin, weydii wixii su'aal ah ee aad qabto.

Marka adiga iyo qoyskaagu aad kaalmada dhaqaale ka heshaan Explore Health, waxaad oggolaanaysaan inaad fulisaan waajibaadyo gaar ah. Waxaa dhici karta in lagaa joojiyo kaalmada dhaqaale ama lagaa dalbado inaad dowladda u celiso lacag (magdhow) haddii aad hesho kaalmo ka badan inta aad xaqa u lahayd. Waxaad yarayn kartaa khatarta ah in lacag lagugu yeesho adigoo soo sheegaya isbadellada xaaladdaada ku soo kordhay (hoos ka eeg). Arrintan waxaad wax badan ka ogaan doontaa marka aad foomka 8965 la gudbiso canshuur-celintaada federaalka. Lacag kasta oo lagaa rabo inaad celiso waxaa lagu dari doonaa xisaab-celintaada canshuurta federaalka.

Xuquuqahaaga: Waxa aad ka filan karto Explore Health

- Explore Health waxay kula dhaqmi doontaa si xushmad leh oo ku dheehan caddaalad iyo ixtiraam.
- Waxaad xaq u leedahay inaad wax ka weydiiso oo aad codsato caymis ama barnaamij kasta oo laga heli karo Explore Health. Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga u gudbinno adeegyo kale oo aad u qalmi karto. Waxaad xor u tahay inaadan oggolaan in macluumaadkaaga lala wadaago adeegyadaas.
- Waxaad codsan kartaa xaqiijin muujinaysa in foom kasta oo aad u gudbisay Shuraakada diiwaangelinta ee Explore Health la helay.
- Waxaad nagala soo xiriiri kartaa Boggaaga Codsadaha (Applicant Dashboard), qaybta wada sheekeysiga tooska ah, taleefanka, fakiska, boostada, farriin qoraaleed ama iimayl. Waxaad sidoo kale codsan kartaa inaad la hadasho qof mas'uul ah.
- Waxaad codsan kartaa in lagaa caawiyo arjiga, buuxinta foomamka ama soo sheegidda isbeddellada, iyadoo la adeegsanayo luqadda aad doorbidayso.
- Explore Health waxay ku siin doontaa macluumaad ku qoran luuqad ama qaab aad fahmi karto.
- Explore Health waxay ku dadaali doontaa inay daboosho baahiyahaaga haddii aad naafo tahay. Waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Xuquuqda Dadka Naafada ah (Americans with

Disabilities Act) iyo Qodobka 504 ee Xeerka Baxnaanada iyo Dhaqancelinta (Rehabilitation Act).

- Waxaad codsan kartaa inaad aragto qoraallada ama diiwaannada adiga kugu saabsan ee ku jira koontada qoyskaaga.
- Macluumaadka aad siiso Explore Health waa kuwo asturan, waana la dhowraa. Waxaad ka akhrisan kartaa **Siyaasaddeena Asturnaanta Xogta** barta ExploreHealthOR.gov/Privacy halka Siyaasaddeena Ka-hortagga **Khiyaanada**, **Lunsashada, iyo Ku-tagrifalka** ka eegi kartaa barta ExploreHealthOR.gov/FWA.
- Waxaad qaadan kartaa racfaan haddii aadan ku qanacsanayn go'aanka Explore Health gaartay waxaa ka mid ah sida:
  - In aad u qalmi waydo kaalmada dhaqaale
  - Qaddarka kaalmada dhaqaale ee aad xaqa u leedahay
  - In aad buuxin waydo shuruudaha u qalmitaanka Muddada Gaarka ah ee Is-diiwaangelinta (Special Enrollment Period)
  - In laguu diido inaad iska diiwaangeliso qorshe caymis caafimaad ama midka ilkaha
  - Joojinta qorshahaaga Explore Health
  - Taariikhda uu caymiskaagu bilaabanayo
  - In laguu diido dib u soo celinta caymiska kadib isbadel nololeed oo saameeya caymiskaaga caafimaad ama kaydkaaga dhaqaale, (tusaale ahaan isbeddel ku yimaadda dakhliga, tirada dadka qoyska ama xaaladda caymiska)
  - Go'aannada u-qalmitaanka ee ka dhasha isbeddello nololeed oo saameeya caymiska ama kaydka dhaqaale
  - Dib u dhac ku yimaadda go'aaminta u-qalmitaanka ama soo dirista ogeysiiska
  - Go'aan kasta oo kale oo Explore Health ka gaaro u-qalmitaankaaga oo aan kor ku xusnayn
- Explore Health Enrollment Partner ama Wakiilka Adeegga Macaamiisha ayaa kaa caawin kara buuxinta foomka racfaanka.
- Waxaad haysataa 90 maalmood laga bilaabo taariikhda ku qoran Ogeysiiska Go'aanka U-qalmitaanka ee Explore Health si aad racfaan u qaadato (haddii arrintu la xiriirto jinsiyadda Maraykanka ama socdaalka, muddadu waa 95 maalmood).

Waajibaadkaaga: Waxyaabaha lagaa rabo inaad samayso

Haddii aad codsanayso caymis adigoo adeegsanaya Explore Health, waxaa lagaa rabaa inaad:

- Explore Health siiso macluumaad run ah, sax ah oo dhammaystiran.
- Soo gudbiso caddaymo lagu xaqiijinayo macluumaadka qaarkood ee aad bixisay haddii aan laga xaqiijin karin kaydadka xogta ee dowladda federaalka iyo tan gobolka.
- Explore Health u soo sheegto isbeddellada ku yimaadda xaaladdaada (hoos ka eeg)
- Haddii lagaa rabo, bixiso lacagta caymiska ee bil kasta si qorshahaaga caymiska caafimaadka iyo/ama midka ilkaha uu u sii shaqeeyo. Lacagtaas waa in si toos ah loo siiyaa shirkadda caymiskaaga.
- Codsato in lagaa joojiyo caymiska Explore Health haddii aad u qalanto caymis kale oo caafimaad, oo ay ku jiraan caymis uu bixiyo cida aad u shaqaynayso, Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP), Medicare ama caymiska caafimaadka ee VA.

Soo sheegidda isbeddellada

Haddii laguu oggolaado kaalmada dhaqaale, waa inaad soo sheegtaa isbadellada qaarkood ee saameeya adiga iyo dadka kale ee qoyskaaga ee ku jira qorshaha caymiska. Haddii aadan soo sheegin isbeddellada lagaa rabo inaad soo sheegto, waxaa dhici karta inaad hesho kaalmo dhaqaale oo ka badan inta aad xaqa u leedahay. Waxaad qaadi ma'uuliyadda ah inaad soo celiso qayb ama dhammaan lacagta dhimista canshuurta ee khidmadaha caymiska ee aad heshay.

Marka laguu oggolaado kaalmada dhaqaale, Ogeysiiska Go'aanka U-qalmitaanka ayaa ku siin doona faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan isbeddellada ay tahay inaad soo sheegto. Waa inaad isbeddellada ku soo sheegtaa 30 maalmood gudahood si aad uga fogaato helitaanka lacag-hormaris canshuur-dhimis ah oo ka badan inta aad xaqa u leedahay. Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa ExploreHealthOR.gov ama marka aad gasho Boggaaga Codsadaha (Applicant Dashboard).

Marka aad soo sheegto isbeddel, sistamka Explore Health ayaa kuu sheegi doona haddii lagaa rabo inaad soo gudbiso dukumiintiyo caddayn ah. Haddii isbeddelku saameeyo caymiska aad ku jirto, Explore Health ayaa kula soo socod siin doonta. Haddii aadan hubin inaad u baahan tahay inaad soo sheegto isbeddel, waxaad talo weydiisan kartaa Explore Health Enrollment Partner ama Wakiilka Adeegga Macaamiisha.

Explore Health: Oregon Health Insurance Marketplace
PO Box 191
Salem, OR 97308
855-268-3767 (Wicitaannada adeegyada gudbinta waa la aqbalaa)
ExploreHealthOR.gov